Soo ogow meesha aad ugu tagi karto daryeelka caafimaad beeshaada.

Adiga waxa kuu dhow xulasho daryeel caafimaad aad kala dooran karto. Si wanaagsan u baro iyaga.

ontario.ca/healthcareoptions

Haddii aad ku nooshahay Ontario gudaheeda oo aad u baahato daryeel caafimaad, waxaad haysataa kala doorato sidii hore ka badan. Kala doorashadan ayaa beeshaada dhexdeeda laga heli karaa oo waxay kaliya kaa qaadan kartaa wicitaan taleefan ama gujinta kombiyuuterka.

Waxa inta ka wada wanaagsan, iyada oo wax kala doorashadani ay yihiin kuwo waafajin leh, iyaga oo ay leeyihiin saacado shaqo oo kala duwan iyo adeegyo kala duwan oo ka caawin kara qofka ku dhawaad baahi kasta oo daryeel caafimaad wakhti kasta.

Halkan waxaad ku ogaan kartaa kala doorashada daryeelka caafimaad ee kala duwan ee aad adigu heli karto iyo sida ugu wanaagsan ee aad isticmaali karto iyaga.

Arrintu waa sidii loogu heli marin ka sii wanaagsan daryeelka habboon wakhtiga ku habboon.

Adiga waxa kuu dhow xulasho daryeel caafimaad aad kala dooran karto. Si wanaagsan u baro iyaga.

Telehealth Ontario

Telehealth Ontario waa adeeg lacag la'aan ah oo xog-dhowrnaanna leh oo aad adigu ka heli karto la-talin caafimaad ama macluumaad caafimaad oo guud kalkaaliyeyaal caafimaad sharciyeysan.

Adeeggan adiga oo mara, ayaad adigu haystaa marin u hel wakhti kasta ah xirfadle daryeel caafimaad sharciyeysan oo adiga kaa caawin kara go'aansiga sidii aad isku daryeeli lahayd, sidii ballanta aad uga qabsan lahayd dhakhtarkaaga, sidii aad u tagi lahayd rug caafimaad, sidii aad ula xiriiiri lahayd kheyraadka beesha ee ku dhow, ama sidii aad u tagi lahayd qolka emerjansiga ee isbitaalka.

Taleefan lambarka Telehealth Ontario waa 1-866-797-0000. TTY (Maqal wax-ka-qabka loogu talagalay): 1-866-797-0007.

***Talo siin*: Haddii aad hooyo cusub tahay, ama qof da' weyn, oo ay dhibaato ka haysato dhaqdhaqaaqa, Telehealth ayaa kuu noqon karta xulasho hore oo wanaagsan si ayna kuugu kalifnay inaad ka tagto gurigaaga.**

Xarunta Caafimaadka Beesha

Xarumaha Caafimaadka Beesha ayaa ah meelo bixiya daryeel caafimaad iyo barnaamijyada horumarinta caafimaadka ee loogu talagalay shaqsiyaadka, qoysaska iyo beelaha.

Xarumahan ayaa gaar ahaan caawimaad u leh dadka ay dhibaatada ka haysato marin u helka daryaalka caafimaadka hore sababo ka horjoogsi luqadeed ama dhaqan ahaan, naafanimo jirka ah, guri-la'aani hayso, saboolnimo, ama meelo fog nool.

***Talo siin*: Haddii ku hadalka ama fahamka Ingiriisigu u dhibaato kugu yahay adiga, Xarumaha Caafimaadka Beesha Qaarkood ayaa bixiya adeegyo tarjumaadda ah sidii ay kaaga caawin lahayd daryeelka aad u baahan tahay adigu.**

Barnaamijka Waxbarashada Sonkowrowga

Barnaamijka Waxbarashada Sonkowrowga ayaa marin u siiya dadka sonkorowga qaba qalabyada iyo xirfadaha ay ugu baahan yihiin inay nolol caafimaad ka sii wanaagsan ku noolaadaan. Waxay u fidiyaan adeegyo latalin koox iyo qof min qof ahaan labadaba ah adeegyada la-talinta.

Somali - Health Care Options Brochure Cat# 015381 Nov/2010 © Queen's Printer for Ontario

Ontario

Iyaga oo ay u helaan marin xeel-dheerayaal daryeel caafimaad – oo ay ka midka yihiin tacliimiyeyaal ah kalkaaliye caafimaad iyoxirfad-yaqaano cunto sharciyeysan – ayay shaqsiyaadku baranayaan sida la isku-maamulo oo ay soo saaran karaan qorshooyin nololeed ka caawiya yareynta calaamadaha cudurka oo daahiya ama ka ilaaliya ku sii xumaanta sonkorowga. Xirfadaha oo waxay soo saaran karaan qorshooyinka nolosha sidii ay uga caawin lahaayeen calaamadahooda oo ay u daahin lahaayeen ama joojin lahaayeen arrimaha snokorowga oo ka dara.

***Talo siin*: Haddii adiga ama xubin qoyskaaga ka tirssani ay qabaan sonkorow, la xiriir barnaamij Waxbarsho Sonkorowga oo agagaarahaaga laga helo sidii ay kaaga caawin lahayd adigu inaad hesho xirfadaha si wax-ku-ool leh aad u maareeyso sonkorowga.**

Qolka Emerjanisga

Qolka Emerjansiga (ER) ayaa ah waaxda isbitaalka ee mas'uulka ka ah u fidinta daryeelka caafimaadka iyo qalliinka dadka buka ee u baahan wax-ka-qabshada deg-degga ah ee caafimaad – ee ay ka midka yihiin jirrooyinka ama dhaawacyada daran ee nafta halista galinaya.

***Talo siin*: Waxaad ka heli kartaa macluumaadka dhererka wakhtiga joogitaanka qolalka emerjansiga kuugu dhow: ontario.ca/healthcareoptions**

Dhakhtarka Qoyska iyo Xirfadle Kalkaaliye Caafimaad ah

Dhakhaatiirta iyo xirfadleyaasha kalkaaliye caafimaad ayaa ah bixiyeyaasha muhiimka ah ee daryeelka caafimaadka qoyska. Waxay ku nuuxnuuxsadaan daryeelka caafimaadka qoyska: oo ah garashada iyo daaweynta cudurka, fowdooyinka jirka iyo dhaawacyada bukaanka ee dhamman da' kasta leh.

Waxay bixiyaan daryeel dhakhso leh oo xaaladaha aan deg-degga (emrjanisga) ahayn, iyo waliba daryeel sii socda oo adiga kaa caawiya inaad hesho nolol caafimaad ka sii wanaagsan leh.

***Talo siin*: Haddii aadan lahayn dhakhtar ama xirfadle kalkaaliye caafimaad qoys, isku dey adeegga Ku-Xirka Daryeelka Caafimaadka Adiga oo u waca 1-800-445-1822 ama iska diiwaangaliya internetka barta ku taal ontario.ca/healthcareconnect. Ku-Xirka Daryeelka Caafimaadka ayaa kaa caawin doonta helitaanka dhakhtar ama xirfadle kalkaaliye caafimaad oo laga helo beeshaada.**

Kooxda Caafimaadka Qoyska

Kooxda Caafimaadka Qoyska ayaa isku keenta bixiyeyaal daryeel caafimaad oo kala duwan sidii ay u siin lahaayeen qofka buka daryeel tayo sare leh, kuna saleysan-koox ahaan. Kooxda Caafimaadka Qoyska ayaa loogu talagalay inay ka siiso dhakhaatiirta taageero xeeladlayaasha kale ee daryeelka caafimaadka – ee ay ka midka yihiin kalkaaliye caafimaad, xirfadlayaal kalkaaliye caafimaad ah, cunto yaqaanno iyo farmisteyeyaal – oo wada shaqeeya inay adiga ku siiyaan adeegyo daryeel caafimaad kala duwan.

Kooxaha Caafimaadka Qoysku waxay bixiyaan daryeelka xaaladaha aan emrjanisga ahayn iyo waliba daryeel sii socda oo adiga kaa caawiya inaad hesho nolol caafimaad ka sii wanaagsan leh.

***Talo siin*: Waxaad ka heli kartaa adeegyo caafimaad kala duwan oo badan Kooxda Caafimaadka Qoyska, oo ay ka midka yihiin la talin iyo u hagitaantaka ku noolaanta caafimaadka oo aad ka fogaado jirrada.**

Rugta Caafimaad ee u hoggaamiyo Xirfadle Kalkaaliye Caafimaad

Xirfadlayaasha Kalkaaliye Caafimaad ayaa ah Kalkaaliyeyaal Caafimaad sharciyeysan oo leh waxbarasho iyo khibrad dheeraad leh. Waxay soo helaan oo daweeyaan cudurrada inta ugu badan, oo ay amaraan oo ka turjumaan tijaabooyinka baaritaan caafimaad, oo ay kuu wargaliyaan cudurrada ama waxa ay ogaadeen, inay qoraan daawada oo ay ku sameeyaan habsocodyo gaar ah dhammaan dadka jirran ee da' kasta leh.

Rugta Caafimaad ee u hoggaamiyo Xirfadle Kalkaaliye Caafimaad ayaa ku siin karta adiga daryeelka caafimaad ee hore isla markaa iyaga oo kaa caawiya horumarinta ka hor-tagga cudurka iyo ku noolanta caafimaad. Waxa kale oo aad ka heli kartaa Xirfadleyaal Kalkaaliye Caafimaad oo ka shaqeeya Kooxaha Caafimaadka Qoyska ee ku yaal dhammaan gobolka oo idil iyo goobaaha kale ee noocaca daryeel caafimaad.

***Talo siin*: Haddii aadan lahayn dhakhtar qoys, xirfadle kalakaaliye caafimaad ayaa dorashadeeu aad u wanaagsan tahay. Waxaad ka heli karta mid adeeggayaga Ku-Xirka Daryeelka Caafimaadka adiga oo u waca 1-800-445-1822 ama iska diiwaangaliya internetka barta ku taal ontario.ca/healthcareconnect.**

Xarunta Daryeelka Dhakhsaha Leh

Xarumaha Daryeelka Dhakhsaha leh ayaa siiiya adeegyo dadka buka – iyaga oo aan ballan qabsan – markay u raadsanayaan daaweynta xaaladaha aan nolosha halista galinayn maalinta, galabta iyo Sabtida ito Axadda markay tahay.

Xarumaha Daryeelka Dhakhsaha leh ayaa siiiya daryeel dhakhso leh xaaladaha sahlan ama aan darnayn, ee ay ka midka yihiin dhaawacyada isha, qodobyada, kabitaanka, raajada iyo baaritaanka tijaabooyinka shey-baarka.

***Talo siin*: Haddii aad ka soo bogsaneyso jirro ama dhaawac, Xarumaha Daryeelka Dhakhsaha leh qaarkood ayaa kuu fidin doona ballamo lagula socdo horumarkaaga.**

Rugta Caafimaad ee Bukaan-Socodka/Saacadaha Dambe

Rug caafimaad la iska yimaad ayaa ah goob aad tagi karto in lagugu daweeyo xaaladaha aan darnayn ama aan ahayn emerjansiga. Saacadaha rugta caafimaadka ayaa loo dheereeyaa illaa fiidadka iyo sabatida iyo Axadda, oo uma baahna ballan.

Waxay bixiyaan adeegyo kala duwan oo la mid ah kuwa lagu bixiyo xafiisa dhakhtarka qoyskaaga.

***Talo siin*: Si aad u baajisato wakhti oo aadan lugu'in, iska hubso saacadahooda adiga oo mar hore u soo waca si aad u xaqiijiso inaad u baahan tahay ballan iyo in kale.**

Soo hel daryeel caafimaad adiga kuu dhow.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama aad u ogaato adeegyada gaarka ah ee laga heli karo beeshaada, aad **ontario.ca/healthcareoptions**

Halakn waxaa galin kartaa koodhkaaga boosto ama cinwaankagaa oo ka raadin kartaa Hagaha Kala-Doorashada Daryeelka Caafimaad oo ku tusi doona kala-doorashada daryeelka caafimaad ee laga heli karo beeshaada.

Ma u baahan tahay dhakhtarka qoyska iyo xirfadle kalkaaliye caafimaad?

Haddii aadan lahayn dhakhtar qoys, xirfadle kalakaaliye caafimaad, annaga ayaa kaa caawin karna. Kailya iska diiwaangali Ku-Xiranka Daryeelka Caafimaadka. Waxa lagugu hagaajin doonaa Ku-Xire Daryeel oo kaa caawin doona sidii aad uga hesho heli lahayd daryeel caafimaad qoys beeshaada.

Si aad isku qorto ama aad uga ogaato wax dheeraad ah, u wac 1-800-445-1822 ama aad **ontario.ca/healthcareconnect**

Qalabyada iyo Kheyraadka

Xaaladaha emerjansiga ah: 911

Telehealth Ontario: 1-866-797-0000

Ku-xiranka Daryeel Caafimaad: U wac 1-800-445-1822 ama: **ontario.ca/healthcareoptions**

Health Care Connect: call 1-800-445-1822 or **ontario.ca/healthcareconnect**

Ontario

Dhakhtarkayga Qoys/Xirfadlahayga Kalkaaliye
Caafimaad waa:

_____

Rugta caafimaad ee iigu dhow ee aan iska tagi karo waa:

_____

Farmashiistahagu waa:

_____

Macluumaadka ku yaal waraaq xaqiiqeedan waxa kale oo lagu heli karaa 26 luqaddood. Waxaad ka heli kartaa **ontario.ca/healthcareoptions**, oo laga soo dejisan karo oo lala wadaagi karo dadka kale.

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan adeegyada daryeelka caafimaadka ee ka jira beesha, kana midka yihiin cinwaannada iyo saacadaha shaqada, fadlan booqo **ontario.ca/healthcareoptions** ama uga wac ServiceOntario taleefanka 1-866-330-6206.

Waxaad ka raadin kartaa kala dooroshooyinkaaga daryeelka caafimaad iyada oo ku saleysan cinwaan waddo, boodh boosto, ama magaalo.
Waa wax fudud. Isku day maantaba.

Ontario